SOMALI

DE7TEGN

# 7 ASTAAMOOD EE LAGU GARTO CUDURKA KANSARKA

**Kræftens Bekæmpelse**

Strandboulevarden 49
2100 København Ø
Telefon 35 25 75 00
www.cancer.dk
www.de7tegn.dk

Varenr: 0914
Udgivet: December 2018
Tryk: www.STEP.dk
Layout: Advice A/S
ISBN: 978-87-7064-407-5

# ASTAAMAHA KANSARKA

Waa muhiim in waqti hore la ogaado cudurka kansarka. Haddii cudurka la ogaado inta uu bilowga yahay waxaa siyaadaysa fursada ah in dawaynta cudurka natiijo wanaagsan laga gaaro. Sidaas darteed waxaa muhiim ah in qofku la xiriiro dhaqtarka haddii uu isku arko calaamadaha kansarka.

Buug yarahan waxaa ku qoran astaamaha ugu muhiimsan ee lagu garto kansarka. Calaamadaha halkan ku qoran waxaa sidoo kale yeelan kara cuduro kale oo aan kansar ahayn. Hadaba aqriso si aad u ogaatid marka ay tahay inaad dhaqtarka la xiriirtid ama si aad u caawisid qoyskaaga.

---

## SYMPTOMER PÅ KRÆFT

Det er vigtigt at opdage kræft tidligt. Jo tidligere kræft opdages, jo større er chancen for, at sygdommen kan behandles med et godt resultat. Derfor er det vigtigt at gå til læge, når man har symptomer, der kan tyde på kræft. Denne pjece beskriver de vigtigste symptomer på kræft. Symptomerne i pjecen kan også være tegn på andre sygdomme end kræft. Læs den, så du ved, hvornår du skal gå til lægen – eller for f.eks. at hjælpe familien.



## LIQITAANKA OO QOKA ADKAADA

Qofka oo ay muddo dheer ku adkaato in uu wax liqo waxay astaan u noqon kartaa kansarka hunguriga (cunto mareenka), kansarka caloosha ama kansarka dhuunta. Hase yeeshee liqitaanka oo adkaada waxay inta badan calaamad u tahay cuduro kale sida cuna-xanuunka ka dhasha hargabka.

---

### SYNKEBESVÆR

Længerevarende synkebesvær kan være tegn på kræft i spiserøret, mavesækken eller halsen. Synkebesvær skyldes dog i de fleste tilfælde andre sygdomme f.eks. halsbetændelse.



## ISBEDEL KU DHACA SAXADA QOFKA

Haddii qofku, tusaale ahaan, mar shubmo, haddana calooshu is taagto wax ka badan laba asbuuc ama qofku dareemo in saxaradu ka iman waydo, waxay astaan u noqon kartaa kansarka xiidmaha. Hase yeeshee inta badan waa iska caadi, in qofka calooshu fadhiisato muddo yar. Isbedelada ku dhaca saxaradu waxaa inta badan keena caabuqa (infekshanka) iyo qofka oo bedela qaabkii uu cuntayn jiray ama cuntooyinkii uu cuni jiray.

---

### ÆNDRET AFFØRINGSMØNSTER

Hvis man f.eks. får skiftevis diarré og forstoppelse i mere end to uger eller har en fornemmelse af, at tarmen ikke tømmes helt, kan det være symptom på kræft i tarmen. Det er dog meget almindeligt at have mavebesvær i kortere tid. Ændringer i afføringsmønsteret skyldes som regel infektioner og ændrede madvaner.

# DHIIG-BAX AAN LA GARANAYN SABABTA KEENTAY

## Dhiig soo raaca saxarada

Dhiig soo raaca saxarada ama lagu arko waraaqda toilet-ka, waxay calaamad u noqon kartaa kansarka xiidmaha. Saxarada oo dhiig leh waxay sidoo kale calaamad u noqon kartaa cudurro ay ka midyihiin baawasiirka ama dhaawac gaadha xiidmaha.

## Dhiig soo raaca kaadida

In kaadidu dhiig leedahay waxaa lagu garan karaa, in dhiig la arki karo soo raaco kaadida ama in midabka kaadidu yara casaado. Kaadida oo dhiig leh waxay astaan u noqon kartaa kansarka kelyaha ama kansarka kaadi-mareenka ama kansarka kaadi-haysta, lakin kaadida oo dhiig leh waxaa sidoo kale keeni kara caabuqa kaadi-haysta (infekshan).

## Dhiig ka yimaada saxaaxa (siilka)

Dhiig ka yimaada saxaaxa (siilka) cida-goynta (dhalma-deynsimada) ka dib ama dhiig si aan caadi ahayn u yimaada cida-gaynta horteed waxuu astaan u noqon karaa kansarka ilmo-galeenka ama kansarka dhuunta ilmo-galeenka ku dhaca. Sidoo kale dhiigga yimaada galmada ka dib wuxuu calaamad u noqon karaa kansarka dhuunta ilmo-galeenka. Dhiigga si aan caadi ahay u yimaada waqtiga cida-goynta ka hor waxaa sidoo kale sababa khal-khal (qalad) ku yimaada hormoonada dumarka.

---

### UFORKLARLIG BLØDNING

**Blod i afføringen**
Blod i afføringen eller blod på toiletpapiret efter toiletbesøg kan være tegn på kræft i tarmen. Andre sygdomme, hæmorider eller rifter i tarmen kan dog også give blod i afføringen.

**Blod i urinen**
Blod i urinen kan ses enten som tydeligt blod eller lidt rødfarvning af urinen. Blod i urinen kan være tegn på kræft i nyre, prostata eller blæren, men ses også ved blærebetændelse.

**Blødning fra skeden**
Blødning fra skeden efter overgangsalder eller uregelmæssig blødning før overgangsalder kan være tegn på kræft i livmoderen eller livmoderhalsen. Blødning ved samleje kan også være tegn på livmoderhalskræft. Uregelmæssig blødning før overgangsalder kan også skyldes hormon-forstyrrelser.



# QUFAC IYO XABEEB

Qufacu waa wax caadi ah haddii qofku hargabsanyahay ama sigaarka cabo. Lakin haddii isbedel ku yimaado qufaca qofka ama qufacu dhamaan waayo, waxay astaan u noqon kartaa kansarka sambabada. Haddii qofku dhiig tufo marka uu qufaco waa inuu si deg deg ah dhaqtarka u tagaa.

Haddii qofku xabeebsanyahay waqti dheer waxay astaan u noqon kartaa kansarka dhuunta. Sidaas darteed waa in qofka dhaqtar baaritaan ku sameeyaa. Hase yeeshee inta badan xabeebta waxaa keena cuduro kale oo ay ka midyahay caabuqu (infekshanka).

---

## HOSTE OG HÆSHED

Det er helt normalt at hoste, når man er forkølet, eller hvis man ryger. Men hvis hosten ændrer sig eller ikke forsvinder, kan det være tegn på lungekræft. Hvis man hoster blod op, skal man gå til læge så hurtigt som muligt. Hvis man er hæs i længere tid, kan det være symptom på kræft i halsen. Derfor skal man blive undersøgt hos sin læge. Tit skyldes hæsheden dog andre sygdomme f.eks. infektion.



## GUNTIN (FEEXDA AMA BURADA JIRKA HOOSTIISA KU JIRTA)

Guntintu (burada maqaarka hoostiisa ku jirta) waxay astaan u noqon kartaa cudurka kansarka. Kansarka naasaha ku dhaca waxay dumarku ku ogaadaan si lama filaan ah, iyagoo dareema kuntin ku jirta naaska. Sidoo kale kuntinta laga dareemo xiniinyaha waxay noqon kartaa karsarka xiniinyaha iyadoo aysan jirin astaamo kale oo la dareemi karo. Kuntimaha laga dareemo dhuunta, kilkilooyinka iyo canjirka (qaska) waxaa inta badan keena caabuqa (infekshan), lakin waxay sidoo kale astaan u noqon karaan cudurka kansarka.

---

### KNUDER

En knude kan være tegn på kræft. Brystkræft opdages ofte tilfældigt ved, at kvinden mærker en knude. En knude i testiklen kan vise sig at være testikelkræft, uden at der er andre mærkbare symptomer. Knuder på halsen, under armene og i lysken skyldes som regel betændelse, men kan også være tegn på kræft.



## BARAHA JIRKA OO ISBEDEL KU YIMAADO

Haddii bar jirka ku taalay sii waynaato (balaarato) ama is bedel ku dhaco muuqaalkeeda waxay astaan u noqon kartaa cudurka kansarka. Sidoo kale nabar ka soo baxa jirka ama afka iyadoo aan qofka dhaawac soo gaarin, waxay astaan u noqon kartaa kansar haddii aanu nabarku iskiis baabi'in.

---

### ÆNDREDE MODERMÆRKER

Hvis et modermærke vokser eller ændrer udseende kan det være tegn på hudkræft. Et sår, der opstår på huden eller i munden, uden at man er kommet til skade, kan være tegn på kræft, hvis det ikke forsvinder igen.



# MIISAANKA QOFKA OO SABAB LA'AAN HOOS UGU DHACA

Haddii qofku caatoobo isagoo aan bedelin nidaamkiisii cuntada ama jimicsigiisa waxay calaamad u noqon kartaa kansar. Haddii qof ku talo galay inuu is caateeyo  ka caatoobo intii la filayey, waxaa fiican in qofku la xiriiro dhaqtarka.

---

## UFORKLARLIGT VÆGTTAB

Hvis man taber sig uden grund eller uden at have ændret madvaner eller motionsvaner, kan det være tegn på kræft. Hvis man taber sig mere end forventet efter en slankekur, bør man også gå til lægen.

# DHAQTARKA TAG HADDAAD ISKU ARAGTID:



### QUFAC AMA XABEEB

Qufac iyo xabeeb socda muddo ka badan bil.

### GUNTIMO

Guntin laga dareemo naaska, xiniinyaha ama meel kale oo jirka ah.

### DHIIG BAX AAN LA GARANAYN SABABTA KEENTAY

Dhiigga soo raaca saxarada, kaadida ama dhiig bax aan la garanayn sababta keentay oo ka yimaada siilka.

### BARAHA JIRKA

Isbedel ku dhaca baraha jirka iyo dhaawac aan ku bogsan muddo bil ah.

### WAX LIQIDDA OO ADKAATA

liqidda oo adkaata muddo ka badan hal bil.

### ISBEDEL KU DHACA SAXARADA

Isbedel ku dhaca saxarada, tusaale ahaan haddii saxarado muddo ka badan laba asbuuc isku bedbedesho shuban iyo calool istaag (fadhi).

### MIISAANKA QOFKA OO SABAB LA'AAN HOOS UGU DHACA

Miisaanka qofka oo sabab la'aan hoos ugu dhaca, iyadoo aanu qofku bedelin nidaamkiisa cunto ama jimicsi.